

Waad ku mahadsan tahay doorashada Madxafka Farshaxanka Columbus. Waxaan rajeynaynaa in turjumaada bogani kaa caawin doonto inaad si fudud u dhex muaashixi kartid goobtayada iibka.

Xaga sare ee bog kasta waxaad ku arki doontaa:

REGISTER/ISDIWAANGALI (Guji halkan hadii aad rabtid inaad iska diwaangalisid goobta tigidhada. Tani waa lagugula talinayaa sidaas darteed waxaad heli doontaa iibsi degdeg ah. Sidoo kale markale ayaad dooran kartaa talaabadan.)

SIGN IN /GAL (Guji halkan hadii aad mar horeba isku diwaangalisay inaad ku saxeexdid magaca isticmaalaha iyo furaha sirta ah.)

Xubnaha CMA, GAL marka hore
Xubnuhu waxay helaan galitaan bilaasha.

Hadii la helaayo, qiima dhimista xubnuhu waxay shaqeyn doontaa ka dib markaad **ADD TO CART/KU DAR SANDUUQA**.

Miyaad u baahan tahay inaad is diwaangalisid? Guji **REGISTER/ISDIWAANGALI** xaga sare.

Miyaad ilowday furahaagii sirta? Guji **SIGN IN/GAL** oo ka dibna **FORGOT PASSWORD /ILAAWAY FURAHA SIRTA AH**. Fadlan ogow: if you do not receive your forgot password email within 5 minutes then you have not registered with this email. Click REGISTER to add this email to your record. Hadii aanad helin iimaylka ilowshaha furahaaga sirta 5 daqiiqo gudohood waxay ka dhigan tahay inaanad isku diwaangalin iimaylkan.

Caqabadaha farsamo? Wac (614) 629-0359 ama iimayl u dir membership@cmaohio.org.

Si aad u iibsatid galitaanka guji **“Timed Admission Tickets” /“tigidhada galitaanka”** wakhtiga iyo taariikhda aad rabtid inaad booqatid liiska. Tigidhada **“Reduced Capacity Time” “Wakhtiga la Yareeyey”** waxa lasiiyaa booqdayaasha raba in ay aad u taxadiraan oo ay booqdaan wakhtiyada bilaa buuqa ah.

Maalmaha la helaayo:

Tuesday /Salaasada

Wednesday /Arbacada

Thursday/Khamiista

Friday/Jimcaha

Saturday/Sabtida

Sunday/Axada (galitaanka guud waa bilaash Axada)

Bilaha:

January/Janaayo

February/Febraayo

March/Maarij

April/Abril

May/May

June/Juun

July/Julaay

August/Ogos

September/Sabtembar

October/Oktoobar

November/Noofambar

December/Diseembar

Markaad dooratid taariikhda iyo wakhtiga booqashadaada waxa lagu gayn doonaa boga tigidhada halkaasi oo aad ka dooran kartid tirada iyo nooca tigidhada aad u baahan tahay (waxa jira bog turjumaad gaara oo kaa caawinaya dhex mushaaxa). Markaad dooratid tigidhadaada waxaad gujin doontaa **ADD TO CART/KU DAR SALADA**.

Ka dib waxa lagu gayn doonaa boga iibka.

- Halkan waxaad ka helaysaa akhtiyaarada **Continue Shopping/Sii wad dukaamysiga** ama **Empty Cart /Salad Madhan** ee xaga sare.
- Sanduuqa ku calaamadsan **Tickets /Tigidhada** waxaad ku arki doontaa tirada iyo nooca tigidhada aad iibsaneysid, taariikhda iyo wakhtiga booqashadaada, iyo wadarta iibkaaga. Waxaad sidoo kale iska saari kartaa tigidhada gaarka ah adoo gujinaaya **remove/kasaar** ee xaga sare.
- Tigidhkaaga hoostiisa waxa ah sanduuqa **Make an additional donation/Samee Deeq Dheeriya** halkaasi oo aad kaga dari kartid deeqaha guud ee CMA hadii aad rabtid (tani waa caadi).
- Waxaad sidoo kale ku dari kartaa **Discount Code/Furaha Qiimo dhimista** hadii lagu siiyey mid (tani waa marmar iyo dhif). Hadii aad mid haysatid hubi inaad gujisid badhanka **APPLY/CODSO** ee xaga sare.

Xaga hoose ee boga iibka waxaad galin doontaa **Personal Information/Macluumaadka Gaarka ah** oo ay ku jiraan:

- First Name/Magaca Koobaad
- Last Name/Magaca Labaad
- Phone/Tilifoonka
- Email/Iimaylka
- Address/Ciwaanka
- City/Magaalada
- State/Gobolka
- Zip/Furaha

Use this as my billing address/U isticmaal tan ciwaankayga boostada ahaan si toosa ayaa loo hubin doonaa. Hadii aad leedahay ciwaanka duwan, ha calaamadin sanduuqa si aad u galisid macluumaadka.

Guji **Register for site /Iskadiwaangali goobta** sanduuqa hubinta hadii aad jeclaan lahayd inaad imika si idwaangalisid. Maaha inaad isdiwaangalisid hadii aanad rabin.

Macluumaadka Isdiwaangalinta:

Si aad iskaga diwaangalisid Madxafka Farshaxanka Columbus, fadlan dooro sanduuqa oo gali furaha. Markaad gashid, waxay soo dhigaysaa foomamka macluumaadkaaga. Xubnaha CMA waa inay isdiwaangaliyaan oo ay galaan si ay helaan qiimo dhimista xubnaha.

Markaad u diyaargarowdid inaad iibsatid guji **CHECK OUT/HUBI**.

Hadii aad u baahan tahay inaad galisid lacag bixinta waxaad arki doontaa ogeysiis odhanaya **COMPLETE PAYMENT/DHAMEYSTIR LACAG BIXINTA**. Waxaad galin doontaa lacag macluumaadka lacag bixintaada oo ay ku jiraan.

Name on Card/Nagaca Kaadhka

Card Number/lambarka Kaadhka

Expiry/Dhicitaanka (ama taariikhda dhicitaanka)

CSC/ CSC

Guji **Finish and Pay/Dhamee oo bixi** xaga hoose markaad dhameysid.

Hadii aanad u baahneyn inaad sameysid lacag bixin waxa toos lagu gayn doonaa boga xaqiijinta. Waxaad soo qaadan kartaa nuqulka xaqiijinta boga Madxafka si aad galisid maalinta iyo wakhtiga. Waxaad sidoo kale heli doontaa iimaylka xaqiijinta iibkaaga aad soo qaadan kartid si aad ugu gashid maalintaada aad dooratay iyo wakhtiga. Waxaan sidoo kale ka eegi karnaa tigidhadaada magaca iyo iimaylka aad ku sameysay iibka miiska galitaanka markaad timaadid.